

# Title I, Part A ee Xeerka Arday Kasta Ha Guulayso (ESSA)

Waxay siisaa kaalmo dhaqaale hay'adaha waxbarasho ee gobolada iyo deegaanada (LEAs) si ay u buuxiyaan baahiyaha waxbarasho ee ardayda. Taageerooyinkan waxbarasho ee dheeraadka ah waxay ka caawiyaan ardayda inay buuxiyaan heerarka tacliinta gobolka ee loolanka leh iyo xidhitaanka galDALoolada ka jira fursadaha waxbarasho.




**Title I, Part A Office**  
Office of Superintendent of Public Instruction  
Old Capitol Building  
PO Box 47200  
Olympia, WA 98504-7200  
360-725-6100

U.S. Department of Education  
1-800-USA-LEARN (872-5327)

OSPI waxay ku bixsaa barnaamijyada iyo adeegyadadeeda si loo siman yahay iyada oo aan cidna lagu takooray jinsiga, isirka, caqiidada, diinta, midabka, waddanka qofku ka soojeedo, da'da, dadka ciidamada ka fadhiistay ama dadka wali kujira, doorashada galmada oo ay kujirto muujintaa ama aqoonsiga jinsiga, jiritaanka wax naafio ah ee dareenwadka, garashada, ama jidhka, ama isticmaalka hagista ey tabobaran ama xawaayaanka dadka u haga ee qofka naafada ah. Wixii su'aalo ama cabashooyin kusaabsan takoorka waa in lagala xidhiidho Agaasimaha Sinnaanta iyo Xuquuqda Rayidka (360) 725-6162 ama P.O. Box 47200 Olympia, WA 98504-7200.

Baaritaan ayaa muujinaya marka ay dugsiyada, qoysaska, iyo kooxaha bulshadu wada shaqeeyaan si loo taageero waxbarista, in ay carruurtu ku fiicnaadaan hawlaho dugsiga, ku nagaadaan muddo dheer dugsiga, oo si badan u jeclaadaan dugsiga.



Hagaha Qoyska

Waa maxay

**Title I, Part A?**

$\sqrt{123}$

A<sup>B</sup><sub>C</sub>

Xafiiska Isuduwaaha  
Waxbarista Dadweynaha,  
Title1/LAP Department

## Waa maxay dugsiyada ay Title I, Part A u Adeegto?

Barnaamijku wuxuu u adeegaa ardayda waxbarashada hore, barnaamijyada dugsiga kahor, iyo dugsiga barbaarinta ilaa dugsiga sare kuwaasi oo muujiyey baahida ay u qabaan kaalmo waxbarasho oo dheeraad ah. Adeegyada Title I, Part A waxa heli kara ardayda mutaysatay ee dhigta dugsi gaar loo leeyahay, kaasi oo codsaday inuu kaqaybqaato barnaamijka Title I, Part A.

## Waalidka iyo Qoysaska

Waxaad ku caawin kartaa guulaysiga ilmahaaga inaad noqoto kaqaybqaate firfircoон dugsiga ilmahaaga:

- ✓ **Xidhiidh samee:** Xogogaal aha dhakhsana uga jawaab wixii farriimo kaaga yimaad dugsiga ama degmo dugsiyeedka.
- ✓ **Tusaale noqo:** Tusidda ilmahaaga in waxbarashadu tahay muhiim adiga oo u akhrinaya, imaanaya shirarka waalidka/macallinka, oo imanaya “guryaha cid walba u furan.”
- ✓ **Isdirenimo ku shaqee:** Isdirenimo kaga shaqaynta dugsiga ilmahaaga iyo ka caawinta hawlahu manhajka ka baxsan. Kaqaybqaado oo taageer hawlahu ku-lug-lahaanta ee dugsiga.
- ✓ **Baro:** Sida looga caawiyo ilmahaaga shaqada fasalka, shaqada guriga, iyo qorshayaasha waxbarashada mustaqbalka.
- ✓ **Ku lug lahow:** Ku biirista ururrada dugsiga/waalidka, kooxaha wanaajinta dugsiga, golaha la-talinta Title I, Part A, iyo guddiyada kale ee waalidka.
- ✓ **La shaqee bulshada:** Adigoo kala qaybqaadanaya hawlahu waalidka qoysaska kale, baro oo isticmaal khayraadka bulshada ee deegaanka, sida laybareeriyyada, jaamicadaha, xarumaha bulshada, iwm., si aad u kordhiso xirfadaha iyo hibooyinka si aad ugu hesho adeegyada loo baahan yahay ilmahaaga.



## Muxuu Title I, Part A siin doonaa ilmahayga?

Title I, Part A waa barnaamij fadaraal kaasi oo bixiya adeegyo iyo hawlo waxbarasho oo dheeraad ah. Taageerooyinkan dheeraadka ah waxay ka caawiyaan ardayda buuxinta heerarka tacliinta gobolka ee loolanka leh iyo xidhitaanka galdaloolada ka jira fursadaha.

### Kaalmo waxbarasho oo dheeraad waxa laga heli karaa:

- Agabka barista kuwaasi oo kabaya waxbarista caadiga ah ee ardayga
- TMacallimiinta iyo caawiyyaasha waxbarista
- Waxbarista qof-calaa-qofka ah ama koox yar ah
- Taageerooyinkan waxbarasho dheeri ah

## Sidee dugsiyadu ku helaan lacagaha

### Title I, Part A

- Ugu horrayn, dawladda fadaraalka ah waxay siisaa lacag gobol kasta taasi oo kusalaysan xog tirakoob. Kadib, Hay'adda Waxbarasho ee Gobol kastaa (SEA) waxay siisaa lacagta Hay'adaheeda Waxbarasho ee Deegaanka (LEAs). LEAs waxay go'aamisaa dugsiyada mutaystay lacagta Title I, Part A iyadoo raacaysa xeerarka Title I Part A ee ESSA.
- (Ugu dambayn, LEA kastaa waxay go'aamisaa dugsiyadooda kuwa heli doona adeegyada barnaamijka Title I, Part A oo kusalaysan boqollayda Qadada Bilaashaka iyo Tan Qiim-dhimista leh ee dugsiga. Kadibna dugsigu wuxuu:

1. Aqoonsan ardayda u baahan kaalmada waxbarasho ee dheeraadka ah oo kusalaysan shuruudaha la rabo. MA AHA ardaydu inay ka yimaadeen qoysaska saboolka ah si ay u helaan adeegyada Title I, Part A.
2. U dhigi yoolal hagaajinta xirfadaha ardayda waxbarasho ahaan liita ee dugsigaaga.
3. Soosaari barnaamijyo arday kasta si uu u taageero/kabo waxbarista fasalka ee caadiga ah.
4. Cabbirri horumarka ardayga si loo go'aamiyo guusha barnaamijka Title I, Part A ee arday kasta.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee laxiriira Title1, Part A nagu soo booqo onlayn:**

**<http://www.k12.wa.us/TitleI>**